



Lifaaqa Foomka In aanad Ka Qeybqaadan Qiimeynta Gobolka

Diisembar 6, 2022

Qoysaska Qaaliga ah ee PPS,

Iyada oo la raacayo xeerarka Waaxda Waxbarashada Oregon, waxaan idin siineynaa [Foomka Wargalinta 30 Maalmood ee In aanad Ka Qeybgalin](#) Qiimeynta Luqada Ingiriiska iyo Xisaabta ee Guud ahaan Gobolka. Ogeysiiskani waxaa laga helayaa isaga oo ku qoran luqadaha Ingiriiska, Isbaanishka, Fiitnaamiska, Shiinaha, Ruushka iyo Soomaaliga [Shabakada Cilmi-baarista, Qiimeynta iyo Isla Xisaabtanka ee PPS](#).

In ardayda Gobolka oo dhan imtixaan laga qaadaa waxay qeyb ka tahay nidaamkayaga qiimeynta isku dheelitirka ee aan siino dhammaan ardayada, gaar ahaan ardayda taariikh ahaan helin fursadihii ka caawin lahaa horumarkooda. Xogta aan ka helno qiimeynta ardaydu waxay muhiim noogu tahay go'aanada degmada iyo mudnaanta dugsiyada sidii loo horumarin lahaa waxbarashada ardayda.

Haddii aad haysaan su'aalo, fadlan waxaad la xiriirtaan xafiiska dugsigiina.

Mahadsanid,

Waaxda Cilmi-baarista, Qiimeynta iyo Isla Xisaabtanka ee PPS